Talaabooyinka 6 Janaayo

Dawladdu waxay leedahay xeerar si ay fayraska Koronaha u joojiso. Xushmee xeerarka. Haddii aad sidaas yeesho xanuunku kugu dhici maayo qof kalena ku ridi maysid. Bilayska ayaa ku kantarooli kara.

Fiiro gaar ah: Magaalooyinka iyo degmooyinka qaarkood waxay leeyihiin xeerar dheeri ah. Hubi bogga interneetka ee magaaladaada ama degmadaada.

Talooyin si loo helo deyr iyo jiilaal nabdoon

- Is tallaal.
- Ka fogow dadka kale 1.5 mitir.
- Xiro maaskaro afka.
- Si fiican u leeri guriga: fur daaqadaha.
- Si joogto ah isu baar.
- Sigaar ah u ilaali dadka nugul. Tusaale ahaan: dadka ka weyn 65 sano, dadka qaba dhibaatooyinka wadnaha, sambabada ama kelyaha iyo dadka u nugul caabuqyada

Covid Safe Ticket (CST) -Tigidka Badbaadada ee Covid-ka

- Meelaha qaarkood waxaad u baahan tahay Covid Safe Ticket (CST), tusaale ahaan
    - Marka aad joogto Kafee ama makhaayad
    - Xarumaha jirdhiska
    - kulamada ama dhacdooyinka ay ka soo qayb galaan in ka badan 50 qof gudaha ama 100 qof oo dibadda ah
- Covid Safe Ticket ayaa cadaynaya in
    - si buuxda laguu tallaalay ugu yaraan 14 maalmood gudaheed.
    - ama aad soo martay baaris koronaha ah oo taban (negatief) (ugu badnaan jiraa 72 saacadood).
    - ama uu dhawaan kugu dhacay korona (in aan ka badnayn 180 maalmood ka hor)
- Waxaad ka heli kartaa Covid Safe Ticket www.covidsafe.be ama app-ka CovidSafeBE.

Maaskarada afka

- Ma jirtaa 6 sano ama in ka badan? Markaa maaskarada afka waa qasab goobaha dadweynaha. Tusaale ahaan:
    - Dukaanka dhexdiisa

- Gaadiidka dadweynaha
- Xarunta daryeelka caafimaadka; tusaale ahaan cisbitaalka ama xarunta daryeelka waayeelka
- Marka aad joogto timo-jaraha ama qurxinta-gaarka ah
- Hoolka-tiyaatar-ka, hoolka-riwaayadaha, xarunta isboortiga,...
- Maktabadda dhexdeeda
- Inta lagu jiro cibaadada
- Inta lagu jiro munaasabadaha dadweynaha, tusaale ahaan ciyaaraha isboortiga ama riwaayadaha
- Marka la joogo aroos ama aaska/duugta, ay joogaan, in ka badan 50 qof gudaha ama 100 qof oo dibadda ah
- Kafee ama makhaayad
- Marka la joogo iskuulka

Shaqo

- Ku shaqee guriga. Tani waa qasab.
  - Waxaad aadi kartaa shaqada hal maalin todobaadkii. La ballan masuul-kaaga.
- Guriga kuma shaqayn kartid? Markaa waxa cadayn ku siin doona masuul-kaaga. Raac xeerarka goobta shaqada.
- Su'aalo ma qabtaa? Waxa macluumaad ku siin doona masuul-kaaga.

Dukaammada

- Dukaamadu way furan yihiin.
  - La adeego ugu badnaan 2 qof. Tani ma khusayso carruurta da'doodu ka yar tahay 13 sano.
- Waxaa jira suuq.
- Dukaanka habeenkii shaqeeya wuxuu furan yahay ilaa 23:00.
- Timajarayaasha iyo xirfadaha kale ee aan caafimaadka xiriir la lahayn way furan yihiin. Tusaale ahaan: daryeelka cagaha iyo qurxinta cidiyaha, goobaha qurxinta gaarka.
- Xiro maaskaro afka ah.

Hoteellada, maqaaxiyaha iyo kafateeriyadaha

- Kafateeriyadaha iyo maqaaxiyaha waxay furan yihiin ilaa 23:00.
  - Waa inaad haysataa Covid Safe Ticket. Waxaad ka heli kartaa tigidka Covid Safe Ticket www.covidsafe.be ama app-ka CovidSafeBE.
  - Xiro maaskaro afka Miis ma fadhidaa? Markaa maaskarada afka waad iska furi kartaa.
  - Waxa aad miiska la fariisan kartaa ugu badnaan 6 qof.

Xiriirka bulshada

- Gurigaaga dad waad ku martiqaadi kartaa.
  - Sida ugu fiican waa inaad banaan ku qaabishaa.
  - Is baar ka hor inta aanad dadka martiqaadin. Waxaad ka iibsan kartaa iskaa-iskubaarta (zelftest) farmashiyaha.
  - Waxa fiican inaad yarayso martiqaadka dadka.
- Ma leedahay xaflad gaar ah? Tan waxa kaliya la ogol yahay inaad gurigaaga ku qabsato ee lama ogola goobaha xafladaha, tusaale ahaan qolka xafladaha. Yaree martiqaadka dadka ama dibadda kula balan.

- Aroos ama aaska waa loo ogol yahay goobaha wax lagu qabsado. Raac xeerarkan:
  - Waxa aad miiska la fariisan kartaa ugu badnaan 6 qof.
  - Ma joogaan dad ka badan 50 qof ama 100 qof oo dibadda ah?
    - Xiro maaskaro afka
    - Waa inaad haysataa Covid Safe Ticket. Waxaad ka heli kartaa tigidka Covid Safe Ticket www.covidsafe.be ama app-ka CovidSafeBE.

Waqtiyada firaaqada

- Dhacdooyinka ama bandhigyadu waxay ka dhici karaan gudaha iyo bannaanka labadaba. Tusaale ahaan: tiyaatarka, iyo riwaayadaha.
- Dhaqdhaqaaqyada la soo agaasimay, sida naadi ama urur, waxay ka dhici karaan oo keliya bannaanka. In isboorti gudaha goobaha lagula sameeyo naadi ama urur waa la ogol yahay.
- Xarumaha jimicsiga, xarumaha fayoqabka iyo barkadaha dabaasha ayaa weli furan.
- Maktabadaha iyo matxafyada ayaa weli furan.
- Adeegyada cibaadada waa la ogol yahay.

Maxaan la ogolayn?

- Diskooteeg-yada iyo hoolalka qoob-ka-ciyaarku way xiran yihiin.
- Dhaqdhaqaaqyo badan oo goobaha gudaha ah ayaa xiran. Tusaale ahaan: jardiinooyinka madadaalada gudaha, ciyaarta bowling-ka, goobaha madadaalada ee barkadaha dabaasha...
- Tartamadda ciyaaraha isboortiga daawadayaal looma ogola.

U fiirso:

- Ma aadaysaa munaasabad dadweyne oo gudaha ah?
  - Waxa joogi kara ugu badnaan 200 oo qof.
  - Waa inaad fadhiisataa.
  - Waa inaad xirataa maaskaro afka.
  - Ka fogow dadka kale 1.5 mitir.

    - Ma joogaan dad ka badan 50 qof gudaha? Waa inaad haysataa Covid Safe Ticket. Waxaad ka heli kartaa tigidka Covid Safe Ticket www.covidsafe.be ama app-ka CovidSafeBE.
- Ma aadaysaa munaasabad dadweyne oo bannaan-ka ah?
    - Waa inaad xirataa maaskaro afka.
    - Ka fogow dadka kale 1.5 mitir.
    - Ma kasoo qayb-galeen in ka badan 100 qof bannaanka? Waa inaad haysataa Covid Safe Ticket. Waxaad ka heli kartaa tigidka Covid Safe Ticket www.covidsafe.be ama app-ka CovidSafeBE.

Xanaanooyinka (Crèches) iyo Iskuulka

- Xanaanooyinka (crèches) way furan yihiin.
- Carruurtu way aadi karaan dugsiga. Dugsigaaga ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah.
    - Carruurta da'doodu ka weyntahay 6 sano waa inay xirtaan maaskaro afka.
    - Korona (Corona) ma qabaan 4 caruur ah oo fasalka dhigata? Carruurta fasalkaas waa inay karantiil gashaa.

Safarka dalka dibaddiisa:

- Waxa fiican inaadan u safrin meel ka baxsan Midowga Yurub
- Ma aadaysaa dalka dibaddiisa? Waxa jira 3 koodho-midabo ah(kleurcodes).
    - Guduud(Rood): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa ay sarayso. Waxa fiican halkan inaadan u safrin.
    - Liimi(Oranje): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa dhexdhexaad ay tahay. Halkan waxa fiican in aadan u safrin.
    - Cagaar(Groen): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaaddaa ay hoosayso. Halkan waad u safri kartaa.
    - Ka fiiri bogga internetka https://www.info-coronavirus.be/nl/kleurcodes-per-land/
- Dalka aad aadayso xeerarka ka jira ka fiiri bogga internetka ee diplomatie.belgium.be

Markaad ka soo noqoto safarka dibadda

- Ma soo joogtay in ka badan 48 saac dalka dibaddiisa ?
    - Buux-buuxi warqadan (formulier) aad ka helayso https://travel.info-coronavirus.be/nl/public-health-passenger-locator-form inta aanad ku soo laaban Bejamka.
    - Ma waxaad ka timid aag cagaar ah ama liimi ah? Ma'aha qasab inaad isbaarto iyo inaad karantiil gasho midna.
    - Ma waxaad ka timid aag guduud ah oo ka tirsan Midowga Yurub?
        - Ma haysataa Warqadda-cadaynta-tallaalka ama Warqadda-cadaynta-ka-soo-kabashada? Inaad karantiil gasho ama aad isbaarto qasab ma'aha.

    - Ma haysatid Warqadda-cadaynta-tallaalka ama Warqadda-cadaynta-ka-soo-kabashada? Ma haysatid baaritaan koronaha ah oo taban (negatief ah) oo ugu badnaan 72 saacadood jir ah? Isbaar maalinta 1 iyo maalinka 7 ka dib markaad ka soo laabato safarkaaga.
    - Baaritaankaagu ma yahay mid togan (positief)? Markaas waa in aad 10 bari karantiil gashaa
    - Carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano ma aha inay baaritaan sameeyaan.
- Ma waxaad ka timid aag guduud ah oo ka baxsan Midowga Yurub?
    - Ma haysataa Warqadda-cadaynta-tallaalka? Isbaar maalinta 1 ama 2 ka dib markaad ka soo laabato safarkaaga. Baaritaankaagu ma yahay mid taban (negatief)? Markaas waad ka bixi kartaa karantiilka marka aad hesho natiijadaada. Carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano ma'aha inay baaritaan sameeyaan.
    - Ma haysatid Warqadda-cadaynta-tallaalka? Waa inaad karantiil ku jirtaa 10 maalmood. Isbaar maalinta 1 iyo maalinka 7 ka dib markaad ka soo laabato safarkaaga. Natiijada baaritaanka maalinka 7aad ma yahay mid taban (negatief)? Markaa karantiilka waad ka soo bixi kartaa.
    - Waxaa jira dalal aan tani sidaas u ahayn. Liiskan dalakaas waxaad ka heli kartaa https://www.info-coronavirus.be/nl/kleurcodes-per-land/
- Ma waxaad ka timid aag khatar-tiisu ay aad u sarayso?
    - Macluumaad ka guud ee aagaggan waxaa laga heli karaa info-coronavirus.be/nl/hoog-risico-landen/
    - Kani ma yahay waddan ka baxsan Midowga Yurub?
        - Waa inaad karantiil ku jirtaa 10 maalmood. Tan waxaa laga rabaa qof walba.
        - Isbaar maalinta 1 iyo maalinta 7 kadib markaad ku soo laabato Beljamka.
    - Kani ma ka tirsan yahay Midowga Yurub ama aagga Schengen?
        - Ma haysatid shahaado tallaal?
            - Isbaar maalinka 1-aad ee aad guriga ku soo laabato. Baaritaankaagu ma yahay mid taban(negatief)? Markaa waad ka bixi kartaa karantiilka. Kadib mar kale is baar maalinta 7.
            - Baaritaanku ma yahay mid togan (positief)? Waa inaad karantiil ku jirtaa 10 maalmood.
    - Fadlan ogow: waxaa lagugu ganaaxi karaa 250 euro haddii aadan sidan sameyn.

Xeerarkan waxa ay muhiim u yihiin caafimaadka qof kasta. Qofkasta waxa laga rabaa in uu xushmeeyo. In aad sidaa yeesho waad ku mahadsantahay. Si wada jir ah ayaan fayraska Corona-ha u joojinaynaa.